# Nidaamka Maxkamadaha Qoyska Dhexdhexaadinta Qoyska (ENE)

Family Court Process: Early Neutral Evaluation (ENE)

## Maxaa dhici ka dib kolka aan xareysto dacwo furiin ama mid ilmo u xukumid ah?

Ka dib marka aad maxkamadda ka diiwaan geliso warqadaha dacwadda furiinka ama waalidnimada ilmaha waxaa la qabtaa Kulanka Ugu Horeeya ee Maareynta Dacwadaha (ICMC). Waxaa laguu soo dirayaa foomka xog ururinta ee ICMC. **Degmooyinka qaar baa raaca nidaam u degsan oo ku saabsan foomka xog ururinta ICMC**. Faahfaahinta ka akhri foomka waxyaabaha lagaa doonayo. Xusuusnoow in aad nuqul (koobi) gaarsiiso dhinaca kale ama qareenkooda. Degmooyinka qaarkood uma baahna inaad u soo gudbiso foomka macluumaadka ee ICMC gabi ahaanba.



ICMC waa dhageysiga ugu horeeya ee Dacwadaha Qoyska. Waxaa la qabtaa dhageysiga 3 ilaa 4 todobaad marka aad dacwadda diiwaangeliso.

ICMC waa kulan aan rasmi aheyn oo ay ka qeyb qaataan qaaliga, adiga, iyo qofka kale iyo qareenada haddii aad qabsateen. Fikradda ka dambeysa waa in qof kasta uu hadli karo isaga oo xor ah oo la xalin karo waxyaabaha la isku hayo intooda badan.

Haddii ay jiraan waxyaabo aan lagu xalin karin ICMC, waxaa laga yaabaa in qaaligu idiin diro dhexdhexaadinta qoyska (ENE). Waxaa dhici karta in qaaligu uusaan idiin dirin ENE laakiin uu mar dambe idiin diro.

## Waa Maxay Dhexdhexaadinta Qoyska?

Dhexdhexaadinta Qoyska (ENE) waa nidaam ay maxkamaaha qaarkood u adeegsadaan ion ay ku xaliyaan khilaafka la xiriira cidda caruurtu la noolaaneyso, waqtiga booqashada ilmaha, ama lacagta la isku diidan yahay ee ka baxsan dhageysiga rasmiga ah ee maxkamadda. Waa mid aan khasab aheyn, adiga iyo qofka kale ayaa go'aan ka gaara haddii aad dooneysaan iyo haddii kale.

Waxaa laga yaabaa <u>in aadan</u> ka qeyb qaadan karin ENE haddii:

- Aad ka cabsaneyso dhinaca kale.
- Dhinaca kale kugu xad gudbay.
- Aad dareensan tahay in aad si daacad uga hadli karin dareenkaaga iyada oo dad kale joogaan.

## Waxa jira laba nooc oo Dhexdhexaadinta Qoyska ah (ENE):

- Dhexdhexaadinta bulshada (ENE) ee la xiriirta cidda ilmuhu la noolaanayaan iyo booqashada ilmaha.
- Dhexdhexaadinta dhaqaalaha (ENE) oo ah waxyaabaha la isku diidan yahay ee la xiriira hantida. Hantida waxaa ka mid ah deynta.

ENE waxaa maamula dad dhexdhexaad ah oo aqoon u leh sharciyada qoyska, xisaabaha ama la noolaashaha iyo booqashada ilmaha. Degmo kasta waxa ay leedahay nidaam, waqti iyo kharash u go'an waxayna heysaa liiska dhexdhexaadiyayaasha.

Adiga iyo qof kale, ama qareenada ayaa ka doorta dhexdhexaadiyayaasha liiska ay maxmakaddu idin siiso.

## Dhexdhexaadinta Bulshada (SENE):

- Dacwadaha furiinka iyo la noolaashaha caruurta, waa in aad xal iskala gaartaan cidda ilmuhu la noolaanayaan, cidda go'aan u gaareysa iyo waqtiga booqashada ilmaha ee waalidka. Dhexdhexaadinta bulshada (SENE) ayaa idinka caawinaya in aad 3 xal ka gaartaan. Xaaladaha intooda badan, SENE waxaa amri kara qaaliga dhageysta ICMC.

- Degmooyinka qaarkood waxa ay idiin direen Adeegga Qoyska ee SENE laakiin degmooyinka qaar ayaa idin siiya liis aad ka dooratаan. Dhexdhexaadiyayaasha intooda badan waa qareeno ama dad kale oo aqoon u leh oo la shaqeeya qoysaska. Liiska dhexdhexaadiyayaasha waxaa laga heli karaa barta internetka ee maxkamadda degmada.

- Adiga iyo dhinaca kale ama qareenadiina ayaa la kulmaya laba dhexdhexaadiye oo dhexdhexaad ah. Hal qof oo dumar ah iyo hal nin ayaa dhexdhexaadiya si la isugu dheelitiro. Kulanka SENE waxaa inta badan la qabtaa 1 ilaa 3 todobaad ka dib ICMC.



- Inta badan waxa uu SENE qaataa ilaa 3 saacadood. Laakiin waxaa suurogal ah in waqti ka yar uu qaato.

- Inta waxaa jira taariikh kama dambeys ah oo la doonayo in la qabto. Qaaliga dhageysta ICMC ayaa amra in SENE lagu qabto muddo go'an. Inta badan 45 cisho.

## Dhexdhexaadinta maaliyadda (FENE):

- FENE waxa ay idinka caawiyaan in aad heshiis ka gaartaan arrimaha la xiriira maaliyadda. Furiinka, waxa laga hadlaa lacagta daryeelka caruurta, masruuf gaar ah oo dhinac loo qoro, qeybsiga hantida (sida guryaha, gaadiidka, ama xisaabta hawlgabka), qeybsashada deynta, iyo waxyaabaha kale ee la xiriira maaliyadda.  Xaaladaha cidda caruurtu la noolaaneyso, FENE waxaa idinka caawisaa oo kaliya lacagta daryeelka caruurta.

- Mar labaad, qiimeeyeyaashu inta badan waa qareeno ama xirfadlayaal kale oo ka shaqeeya arrimaha qoyska. Liis qiimeeyeyaashaa ayaa waxaa laga heli karaa khadka (online) ee shabakada (website) laanta cadaaladda ee degmadaadda.

- Adiga iyo dhinaca kale ama qareenadiina ayaa la kulmaya laba dhexdhexaadiye oo dhexdhexaad ah. Kulanka FENE waxaa inta badan la qabtaa 1 ilaa 3 todobaad ka dib ICMC iyo SENE.

- Midkood 3 ama 6 saac waqti ah ayaa qabtaa FENE. Laakiin waxaa suurogal ah in waqti ka yar uu qaato.

- Qaaliga dhageysta ICMC ayaa amra in FENE lagu qabto muddo go'an. Inta badan 60 cisho.

## Maxaa dhacaya kulanka ENE ?

**1.** Inta badan kulanadda ENE yaddu waxay ka dhacaan khadka shirarka ee muuqaalka (video) ah. Waxaa dhici karta inaad hal meel wada joogtaan dhamaantiin ama qolal kala duwan oo kumbuyuutarka ah la idin kala geliyo. Qof kasta waxaa fursad loo siinayaa in ay dhinacooda soo bandhigaan. Qofka bilaabay dacwada furiinka ama midda in loo xukumo hayshada ilmaha ah (codsade) ayaa marka hore hadalka la siiyaa. Tani ma aha dhageysi maxkamadeed oo rasmi ah. Waxaa laga yaabaa in dhexdhexaadiyayaasha su'aalo idin weydiiyaan.  Marka uu qof hadlayo, kan kale hadalka kama dhex geli karo umana jawaabi karo. Waa muhim in aad deganaataan.

Qofka kale isna waxaa la siinayaa fursad ay dhinacooda ku soo bandhigaan. Mar kale,waxaa laga yaabaa in dhexdhexaadiyayaasha su'aalo idin weydiiyaan. Qof kale hadalka kaama dhex geli karo kuumana jawaabi karo.



**2.** Marka xiga dhexdhexaadiyayaasha ayaa kaligood kulan qaata. Marka ay soo noqdaan, waxa ay idiin sheegaan haddii ay la tahay in dacwadda qaaliga loo gudbiyo oo isagu go'aan ka gaaro.

**3.** Ka dibna kooxda oo dhan ayaa bilaaba in ay wada hadlaan si heshiis loo gaaro. Waxa suurogal ah in aad arrimaha qaar ama dhamaantood aad heshiis ka gaartaan.

**4.** Waxa ay dhexdhexaadiyayaashu dhamaadka kulanka ENE qoraal warbixin ah ay ku qoraan waxyaabaha aad ku heshiiseen.

- Haddii wax walba la xaliyey, dhexdhexaadiyayaashu waxa ay maxkamadda u sheegaan in dhinacyadu heshiis gaareen. Haddii ay taasi dhaco lagaama doonayo in aad maxkmadda tagto.

- Haddii ay jiraan waxyaabo aan lagu heshiin, dhexdhexaadiyayaasha ayaa maxkamadda u sheega inta lagu heshiiyey. Inta hartay maxkamadda ayaa go'aan ka gaareysa.

- Haddii aan heshiis laga gaarin cidda ilmaha la noolaanayaan, waxaa laga yaabaa in maxkamaddu amarto in qiimeyn lagu sameeyo cidda ilmaha la noolaanayaan ama dhageysiga kama dambeysta ah loo qabto.

- Haddii aan la gaarin wax heshiis ah, waxaa jiri doona dhageysi maxkamadeed oo wax kasta ay maxkamaddu go'aan ka gaarto.

## Maxkamaddu ma ogsoon tahay waxa kadhacay ENE?

Maxkamaddu waxa ay ogaaneysaa oo kaliya heshiiska aad adiga iyo qofka kale gaarteen. Macluumaadka oo dhan waa mid qarsoodi ah. Maxkamaddu ma ogaaneyso wada hadalka, ra'yiga, iyo waxyaabaha aan la isku raacin mudada uu socday kulanka ENE.  Taasi waxa ay dhigeysaa in nidaamka maxkamadda aanay saameyn ku yeelan waxyaabo ka baxsan dhageysiga maxkamadda.



Laakiin waa muhim in aad ogaataan in aysan aheyn in qaar ka mid ah waxyaabaha looga hadlay kulanka ENE aan cadeyn ahaan loo adeegsan karin dhageysiga maxkamadda. Tusaale ahaan, haddii warbixinta dugsiga ee ilmaha lagu soo qaaday kulanka ENE, waa looga hadli karaa maxkamadda. Laakiin ma jiro qof joogay ENE oo ka hadli kara waxyaabaha ka dhacay ENE ee ku saabsan warbixinta ardayga.

## Maxaan la imanayaa kulanka ENE?

- Qoraalada kaa caawinaya odhaahda dhexdhexaadiyaha.
- Liis faahfaahsan oo ku saabsan xaaladaada si aadan u hilmaamin. Sidoo kale, liis ka soo diyaarsi waxyaabaha aad dooneyso in ay ka soo baxaan kulanka.
- Qareenkaaga, gaar ahaan hadii qofka kale qareen leeyahay.
- Sawirada caruurta kulanka ENE.
- Warbixinada maaliyadda ee kulanka ENE. Sida biilasha, canshuur celinta, warbixinta bangiga, macluumaadka ceymiska iyo xisaabaha hawlgabka.
- Qaar ka mid ah dhexdhexaadiyayaasha ayaa kuu soo diraya warbixin faahfaahsan. Waxaa ka mid noqon kara sida aad lacagta aad ku bixiso iyo qoraalada kale ee aad buuxiso iyo canshuur celinta.

## Imisa weeye kharashka ku baxaya dhexdhexaadinta ENE?

Degmooyinku way ku kala duwan yihiin kharashka ENE. Laakiin kharashka ENE ayaa wax badan ka yar kharashka maxkamadda. Haddii uu dakhligaagu yar yahay waxaa suurogal ah in lacag yar lagaa qaado

si laguu caawiyo.  Haddii lagaa daayey lacagta diiwaan gelinta maxkamadda degmooyinka qaarkood way kaa cafinayaan lacagta ENE. Lacagta ay degmadaadu qaado waxaa laga heli karaa bogga maxkamadda ee degmada.


## Ma jiraan waxyaabo aanay ku wanaagsaneyn dhexdhexaadinta ENE?

Dhexdhexaadiyaha waxa uu heystaa maclumaadka aad adiga iyo qofka kale u soo gudbiseen. Haddii ay jiraan macluumaad laga tagay, ama aan si cad loo soo bandhigin ama ay khiyaano ku jirto, dhexdhexaadiyuhu si wanaagsan uma fahmi karo xaaladda. Waxaa suurogal ah in dhexdhexaadiyaha uusan u ekaan qof calaad u sameeyey adiga iyo qofka kale. Taas weeye sababta ay muhim u tahay in aad xilli hore diyaargaroowdo oo aad dhinacaaga si dhameystiran u soo bandhigto.  Qareen ayaa kaa caawin kara inuu ku xusuusiyo soo bandhigidda xaqiiqada oo su'aalo ku weydiin kara si aad u soo bandhigto.

**Xusuusnoow:** waxa ugu xun ee ka soo bixi kara waa in aan heshiis la gaarin. Dhawr saacadood iyo xoogaa lacag ah ayaa ku lumay,laakiin qofna kama liito sharci ahaan halkii ay taagnaayeen ENE ka hor. Mar kale, dhamaan macluumaadka iyo doodaha ka dhaca ENE lalama wadaaagayo maxkamadda.

## Sidee ayaa wax wanaagsan looga gaari karaa ENE?

Mararka qaarkood, marka ay dadku garanayaan sida uu qaaligu u badan tahay inuu wax u xukumo waxaa laga yaabaa in ay heshiis ogolaadaan. Haddii uu dhinac ogaado in aanay heysan dacwad xoog leh, waxaa lagaa yaabaa in ay dhexdhexaadinta ogolaadaan.



Dadka intooda badan, ENE waa marka ugu horeysa ee ay dhexdhexaadin la dhex galo labada dhinac la kulmaan oo dad waayo aragnimo u leh wax ku kordhiyaan.  Taas ayaa u sabab noqota, in dadku doonayaan in ay is fahmaan oo dhinaca kale kala shaqeeyo in heshiis la gaaro. Sidoo kale, maadaama uu ENE uu lacag iyo waqtiba kuu baajinayo waa sabab kale oo dadku uga shaqeeyaan in heshiis la gaaro.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*
**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**